



Refugee & Immigration Legal Centre Inc

RILC TPV & OFFSHORE FAMILY REUNION CLINIC (RUGTA DIB-ULA-MIDOWGA OOYSKA DIBADA IYO FIISOOYINKA TPV RILC)

Xaashidaan macluumaadku waxay sharxaysaa muhiimada uu leeyahay adeega khaaska ah ee Xarunta loo yaqaan Refugee & Immigration Legal Centre, looguna yeero 'RILC TPV & Offshore Family Reunion Clinic'. Ujeedada ugu weyn oo adeegu waa caawinta dadka aan haysan fiisada loo yaqaan Temporary Protection Visa (TPV) iyo Temporary Humanitarian Visa (THV) iyo wixii la xiriira siday ku heli lahaayeen dalabyada fiisada Protection Visa; ama dadka haysta fiisada joogtada ah ama dhalashada Australia oo doonaya dalabyada fiisooyinka hoos imanaya barnaamijka Bini-aadanimada Khaaska ah iyo Qaxootiga {Refugee and Special Humanitarian Program (R&SHP)}.

Waa maxay Xarunta Sharciga Muhaajirida iyo Qaxootiga (Refugee & Immigration Legal Centre)?

Xarunta Sharciga Muhaajirida iyo Qaxootiga waa (The Refugee & Immigration Legal Centre) xarun bulsho oo ku takhasustay dhamaan xaalladaha sharciga muhaajirida iyo qaxootiga, nadaamka iyo waxqabadka. RILC waxay caawintaa dadka qaxootinimada dalbanaya iyo qaxootiga dhex jooga bulshada, goobaha dadka lagu hayo, iyo kuwa jooga wadamada dibada waxayna leeyihiin khibrad aad u ballaaran iyo aqoonta la xiriirta.

Waa maxay ujeedada RILC TPV & Offshore Family Reunion Clinic?

Waa inay bixiyaan talo lacag la'aana iyo caawimo:

- Dadka haysta fiisooyinka TPV & THV kuwaas oo u baahan inay ururiyaan macluumaad iyo/ama dalabayada Protection Visa si loogu xereeyo Wasaarada Socdaalka iyo Arrimaha Qaxootiga (DIMA); iyo
- Dadka haysta fiisada joogtada ah ama dhalashada Australia ah wixii la xiriira qorshaha dalabyada fiisooyinka hoos imanaya R&SHP.

Rugtaan isu keenida ehelku waxay bixin doontaa, 'hal-mar' talada iyo caawimada diyaarinta macluumaad siyaada ah iyo/ama dalabyada Protection Visa ama R&SHP. Nasiib daro, RILC ma awoodi doonto inay joogta u bixiso matalida arjiilayaasha.

Adeega yaa leh?

(a) qofka kasta oo hadda haysta TPV (subclass 785) ama THV (Subclasses 447 ama 451), kaas oo xereeyey dalab kale oo fiisada Protection Visa una baahan inuu siiyo DIMA macluumaad siyaada ah ka hor intan la samayn go'aanka ugu dambeeya oo ku saabsan dalabka; ama aan xerayn dalab kale oo Protection Visa una baahan inuu sidaas sameeyo; **AMA** (b) qof kasta oo hadda ah degane joogta ah ama muwaadin oo doonaya inuu u dalbo qoys dibada jira dalabka R&SHP.

Nasiib daro, awoodayada xadadan darteed ma awoodi doono inaan qof walba caawino. Haddii aan lagu caawimi karin, waxaanu ku siinaynaa magacyada wakiilada Haajirnimada (Migration Agents) kuwaas oo laga yaabo inay ku caawimi karaan.

Yaa bixin doona talada iyo caawimada?

Dadka yimaada rugta caawinta waxaa la-talin doona oo caawin doona Wakiilada Haajirnimada, kuwaas oo khibrad u leh xagga diyaarinta dalabyada fiisada Protection Visa & R&SHP. Kuwaas waxaa ku jiri doona shaqaale waqti buuxa ku shaqeeya oo ka socda RILC iyo Wakiilada Haajirnimada oo tababaran tabarucna ku shaqaynaya.

Caawimo iyo adeeg nooc ah ayaa la bixinayaa?

Rugta caawimadu waxay caawimo iyo talo ka bixinaysaa diyaarinta macluumaad siyaad ah iyo/ama fiisa kale ee dalabka fiisada Protection Visa ama R&SHP. Taas waxaa ku jiri doona:

- Dadka wata fiisooyinka TPV & THV, oo buuxinaya qoraal siyaada ah iyo, haddii ay lagama maarmaan tahay, dhamaan foomamka ; iyo
- Kuwa wata dalabka R&SHP, qorida iyo dhamaystirada qoraal la xiriira xaalladaha shakhsiga dalbanaya fiisada iyo, hadday lagama maarmaan tahay, buuxinta dhamaan foomamka. RILC ma awoodi doonto inay bixiso matalid joogta ah. (Fadlan arag bogga kale).

Sida loo tago ballanta RILC TPV iyo Offshore Family Reunion Clinic.

Waxaa loo baahan yahay ballan si loo tago rugta caawimada. Si ballan loo sameeyo, dadku waxay u baahan yihiin inay qaadaan talaabooyinka soo socda:

1. Ballan la samayso Adeega Talada Habeenimo ee RILC.

Waxaad u baahan doontaa inaad wacdo Khadka Talada Telefoonka, kaas oo shaqeyta maalmaha Arbacooyinka inta u dhexaysa 10ka -4ta galabtii iyo Maalmaha Jimcyayaasha inta u dhexaysa 2da duhurkii ilaa 4galabtii. Nambarka la wacayaa waa (03) 9483 1140. Ballantayada waxaa laga dhigi karaa maalmaha Isniinta ee Adeega Talada Habeenimo (hoos fiiri.)

2. Imaw Adeega Talada Habeenimo ee RILC.

Adeega Talada Habeenimo waxaa la qabtaa maalmaha Isniinta, waxaa la tegi karaa keliya haddii ballan lagu sameeyey Adeega Talada Telefoonka (kor eeg). Adeega, dadka waxaa la siin doonaa faahfaahin siyaada ah oo ku saabsan RILC TPV & Offshore Family Reunion Clinic waxaanuna qaadi doonaa faahfaahin shakhsiyeed. OGSOONOW: Go'aanka ah in RILC ku caawimi karto iyo in kale waqtigaan ayaa la sheegi doonaa. (arag 3 hoos).

3. Ogeysiinta haddii RILC ku caawimi karto iyo haddii kale.

Inta lagu jiro isla asbuuca marka qofku yimaado Adeega Talada Habeenimo, waxaanu samaynaynaa go'aan ku saabsan haddaan ku caawimi karo iyo haddii kale. Waxaanu isku deyi doonaa in aan kuu sheegno go'aan kayaga annagoo telefoon kuu soo dirayna maalinta Jimcaha, waxaanuna warqad kuu soo diraynaa Isniinta ku xigta. Dadka aanu caawin karno waxaa la siinayaa ballan si qofku u yimaado rugta caawimada. Kuwa aan la caawimi karin waxay hellayaan warqad ka hadlaysa Wakiilada Muhaajirnimada oo laga yaabo inay ku caawin karaan.

4. Tegida TPV & Offshore Family Reunion Clinic.

Dadka aanu ogolaanay in la caawimo waxay u baahan doonaan inay yimaadaan ballanta warqada lagu sheegay taas oo loo soo diri doono.

Waa maxay dukumintiga looga baahan yahay in la keeno RILC TPV & Offshore Family Reunion Clinic?

Dadka haysta fiisada TPV & THV waxay u baahan doonaan koobiyada dhamaan dukumintiga iyo macluumaadka kale ee la xiriira fiisadii ugu horaysay ee dalabka Protection Visa (tusaale ahaan, koobiga foomamka oo dhan, qoraallada, dukumintiga cadaynta, warqadaha DIMA). Waxay kaloo keenayaan wixii cusub oo la xiriira dalabka.

Dadka samaynaya dalabyada R&SHP waxay keenayaan dhamaan dukumintiyada iyo macluumaadka kale ee la xiriira dalabka R&SHP, kuwaas oo ay ku jiraan foomamka dalabyada R&SHP oo la buuxiyey iyo dhamaan dukumintiyada dalabyadii hore ee R&SHP. Macluumaad badan oo faahfaahsan ayaa lagu bixin doonaa warqada loo soo diray dadka la ogolaaday in la caawimo.

Ma jirtaa lacag la iska qaadayaa?

Maya. RILC TPV & Offshore Family Reunion Clinic waa adeeg shaqada ku qabta lacag la'aan.

Mutarjum ma la hellayaa?

Haa. Mutarjum aqoon leh ayaa loo helli doonaa qof walba oo u baahan caawimada tarjumada. Markaanu samaynayno ballanta, qofka ayaa sheeganaya inuu u baahan yahay mutarjum iyo in kale, hadday sidaas tahayna, luqada uu qofku door bidayo iyo lajajada uu ku hadlo ama baahiyaha kale ayuu sheegan doonaa.

Goorma xaggeese lagu qabanayaa TPV & Offshore Family Reunion Clinic?

Dadka aanu ogolaano in aan caawino warqad ayaa loogu sheegayaa ballanta, waqtiga, iyo faahfaahinaha kale ee ku saabsan imaanshaha rugta caawimada ee RILC Clinic. Guud ahaan, adeegyadu waxay shaqayn doonaan mar ka mid ah maalmaha fasaxa oo cayiman inta u dhexaysa 9subaxii – 5galabtii. Meesha aad nagala xiriiraysaa waa:

Refugee & Immigration Legal Centre Inc.

95 Brunswick St, Fitzroy VIC 3065

Tel: (03) 9483 1144 Fax: (03) 9483 1136

(06/06)

Somali